
Children's MINNESOTA | The Children's Heart Clinic


# Hypoplastic Left Heart Syndrome (HLHS)

Cilladda Qulqulka Dhiigga Wadnaha Gudihiisa ama HLHS




© 2012 The Children's Heart Clinic

**Wadne Caadi ah**



Ogeysiis:

The Children's Heart Clinic 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404
612-813-8800 * Toll Free: 1-800-938-0301 * Fax: 612-813-8825
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404



© 2012 The Children's Heart Clinic

**Cilladda Qulqulka Dhiigga Wadnaha Gudihiisa ama HLHS**
Hypoplastic Left Heart Syndrome (HLHS)

Wadnaha caadiga ah, wuxuu leeyahay laba qalbacyo kore iyo laba hoose. Dhiigga ka soo noqdaa superior vena cava (halbowlaha dhuunta weyn ama SVC) iyo inferior vena cava (halbowlaha dhuunta yar ama IVC) wuxuu aadaa qalbacyada kore oo wuxuu soo maraa daboolka qalbaca midig hoose. Halbowlaha ayaa isku dhegaya oo dhiigga ayaa ka soo baxaya daboolka sambabka isagoo soo maraya halbowleyaasha sambabbada oo wuxuu ka soo baxayaa dhiigga oo ogsijiin wata. Dhiiggu wuxuu ka soo noqonayaa xididdada sambabka isagoo maraya qalbaca bidixda kore. Ka dib ayuu ka soo baxayaa qalbaca bidix sare oo sii maraa daboolka qalbaca bidix hoose. Qalbaca bidix hoose ayaa isku dhegaya, oo dhiigga ayaa uga sii gudaya halbowlaha dhuunta weyn oo wuxuu ka sii aadayaa jirka intiisa kale.

Hypoplastic left heart syndrome (Cilladda qulqulka dhiigga wadnaha gudihiisa ama HLHS) waa cillado dhowr ah oo ah wax aan caadi ahayn. Left ventricle (Qalbaca bidixda hoose ama LV) waa wax aan kobcin (unug yar oo aan sameysmin) oo aan shaqeyneyn, oo macnaheedu waa qalbaca midig in uu noqdo meel dhiig ka soo burqado. Waxaa jira dhuubasho daran (ciriir) ama xaalad maqnaansho (wax aan la ahayn) dabool ah muruq iyo/ama halbowlaha dhuunta weyn iyo unugga aan kobin ee dhuunta qeybisa dhiigga. Coarctation of the aorta (Dhuubashada halbowlaha weyn ama COA) waxay ku dhacdaa 75% ilmaha qaba HLHS iyo ventricular septal ventricular (duleelka qalbaca hoose ee lagu dhasho ama VSD) waxay ku dhacaan 10%. HLHS waxaa lagu arkaa 8% ilmaha qaba cilladaha wadnaha oo lagu dhasho.

**Wiisiteynta/Calaamadaha Jirka:**

- Garaaca boobsiisa ah (garaaca wadnaha ee degdega ah ), neefta oo ku dhegta (neefsashada oo ku adag), dildillaaca sambabbada, boodboodka halbowlaha ee daciifka ah, iyo xididdada oo isku dhega waa wax dhici kara marka uu ilmuhu dhowr saac nool yahay.
- S2 waxaa ka jira hal cod oo dheer iyo garaacis boodid ah. Caadi ahaan wax guux ah wadnaha kama jiro.
- Congestive heart failure (Wadnaha oo dhiigga soo saari waaya ama CHF) waxa ka imaanaya beer-bararid (beerka oo waynaada).
- Ogsajiintu caadi ahaan waa 90% ama waa ka hoos martaa in yar ka dib dhalashada oo ogsijiin in lagu xiro waxba kuma caawineyso.

**Cilladsheegid:**

- Raajada Xabadka: Heer dhexe ama heer daran oo ah wadne-weynaad (wadnaha oo ballaarta) iyo ciriir ku dhaca xididdada sambabka ayaa la arkaa.
- EKG: Waxaa lagu arkaa right ventricular hypertrophy (qalbaca midige oo unug ahaan weynaada ama RVH).
- Uultarasawnka wadnaha: Cilladsheegid. Waa caawimaad go'aamineysa haddii ay jirto baahi loo qabo tuubbagelinta wadnaha iyo raajada xididda gudahooda ee qalliinka ka hor.
- Tuubbagelinta Wadnaha: Waa wax caawinaya in la qiimeeyo cadaadiska wadnaha. Tuubbagelinta Wadnaha waxaa badanaa la sameeyaa ka hor qalliinka labaad iyo kan saddexaad iyo/ama haddii loo baahdo waxqabadyo dheeraad ah sida buufin ama caag in la geliyo pulmonary artery (halbowlaha sambabka ama PA) ama duubista xididdada qaada dhiigga leh ogsijiinta.

**Maareynta/Daaweynta Caafimaadka:**

- Dhallaanka laga helo HLHS iyagoo ku jira ilmagaleenka, waxaa lagu talinayaa in hooyadu ku umusho iyadoo isbitaal lagu daryeelayo bilaha ugu dambeeya sedkeeda dabadeedna loo wareejiyo Qeybta Daryeelka Dhallaanka si loogu qiimeeyo wadnaha oo wax loogu qabto.
- Daaweynta Prostaglandin E (Xinjirowga dhiigga ama PGE) waa in loogu bilaabo sida ugu dhakhso badan dhalashada ka dib si loo ilaaliyo xididka dheeraadka, sababtoo ah waa meesha keliya ee qulqulka dhiigga jidhka iyo xubin ah muhiim.
- Tuubbagelinta iyo farsamada hawamareenka ayaa lagama maarmaan noqon kara qalliinka ka hor.
- Buufin in qalbaca kore loogu furo dhallaanka qaba cilladda duleelka darbiga wadnaha ayaa caawineysa si loogu hagaajiyo sameynta ogsijiinta si uu qalbaca bidix u yaraado qalliinka ka hor. Hawshan badanaa waxaa lagu sameeyaa sheybaarka tuubbagelinta wadnaha.


© 2012 The Children's Heart Clinic

- Qalliin ah hagaajin ayaa lagama maarmaan u ah badqabka ilaa dhowr marxaladood. Qalliinka ugu horreeya waa in la sameeyo toddobaadka ugu horreeya ee nolosha ilmaha (eeg qalliinka Norwood). Qalliinka labada jiho ee Glenn waxa la sameeyaa inta u dhaxeysa 4 ilaa 6 bilood jir oo qalliinka Fontan ee la fududeeyey inta u dhaxeysa 3 jir ilaa 4 jir.
- Qalliinka koowaad ka dib marka isbitaalka laga saaro, ilmaha waxaa la soconoonaya dhakhaatiirta wadnaha oo waxaa guriga loo siin doonaa qalab lagula socdo culeyska iyo heerarka ogsijiinta. Kilinigga wadnaha in uu la socdo 2 ilaa 3 toddobaad oo kasta ayaa lagula talinayaa ilaa la gaaro qalliinka labaad ee wadnaha.

**Maareynta/Daaweynta Caafimaadka Waa Socotaa:**

- Wadnaha in laga beddelo ayaa loo tixgeliyaa ilmaha qaarkood marka aysan jir ahaan ka bixi karin qalliinka badan ee ah marxaladaha kala duwan.
- Daawada xinjirowga oo ah nolosha oo dhan si looga hortago walax guntameysa (xinjiroobid) ayaa lagula taliyaa (sida, Coumadin, aspirin).
- Garaacista wadnaha oo aan caadi ahayn ayaa soo bixi karta muddo ka dib, oo waa in lagula tacaalo daawo ama in wadnaha batari loo geliyo.
- Beerka oo cabura ayaa dhici doonta muddo ka dib oo waa in lala socdo.
- La-socosho ah daaweynta wadnaha ayaa khasab noqon doonta. Haddii ay tahay in wadnaha la beddelo, waxaa la socon doonta shaqaalaha beddelka xubanaha wadnaha/xumaada.

**Natiijooyinka Mustaqbalka-Fog:**

- Dhallaanka aan la qalin ama aan loo helin fursad looga beddelo wadnaha ma noolaadaan.
- In ay heerka koowaad daaweyntu shaqeyso waa fursad ka badan 95% oo 5 ilaa10 jir in ay ka soo bogsadaan qalliinka Fontan waa 80 ilaa 85%.
- Carruurta/qaangaarka aan lahayn qalbaca bidix ee wadnaha ama ah Fontan waa in wadnaha laga beddelo inta ay nool yihiin.
- Carruurta laga helo HLHS si caadi ah ay u ciyaari karaan oo waa in loola dhaqmo sida ilmaha kale illaa waxyaabo yar oo gaar ah ma ahee:
    - Jimicsiga/adeegsiga jira ee badan waa uu ku xaddidan yahay marka loo barbardhigo carruurta aysan wadnahoodu waxba ka maqneyn oo looma oggola ciyaaraha tartanka ah ee la isku dhaco.
    - Heerkulka iyo meelaha joogga sare badanaa uma dulqaadan karaan.
    - Natiijooyinka korriinka iyo koboca maskaxeed waa ay kala duwan yihiin oo waxaa saameeya xanuunnada kale ee uu ilmuhu qabo, oo waxaa ka mid ah salfudeydka ama ADHD. Qiimeyn ah mid xilliyeed oo ay sameeyaan takhasuska koboca neerfaha ayaa lagula taliyaa inta ilmuhu soo korayo ee noloshooda oo dhan.

 © 2012 The Children’s Heart Clinic